

Bayaanka Kormeeraha guud Jett ee Ku dhawaaqida Gudoomiyaha Gobolka

Maanta Guddoomiyaha Walz wuxuu ku dhawaaqay xiritaanka iskuuladayada inta ka hartay sanad dugsiyeedka 2019-2020. Waxaan ka xunahay inaan awoodi doonin inaan ku soo dhaweyno ardayda dhismayaashayada laakiin aan fahamsanahay go'aannada Guddoomiyaha Gobolka ee badbaadada iyo wanaagga ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska. Waxaa mahad leh dadaalka iyo shaqada adag ee macallimiinteena, shaqaalaheena, iyo maamulayaasha, waxaan diyaar u nahay inaan sii wadno gaarsiinta tilmaamaha iyadoo loo sii marayo Barashada Fogaanta ee guriga. Waxaa naga go'an inaan soo bandhigno khibrado adag oo waxbarasho iyo xiriir macno leh oo aan la leenahay ardaydeenna oo dhan. Qoysasku waxay filan karaan sii wadista cuntada iyo xanaanada caruurta oo loogu tala galay shaqaalaha gurmada. Maalmaha soo socda, degmada iyo maamulka dhismayaasha waxay idinla soo wadaagi doonaan faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waxa la filan karo maadaama aan ku dhammaysanayno sannad dugsiyeedkeenna iyada oo loo sii wadeeno Waxbarshada Masaafada ee guriga. Waxaa mahad mudan ardaydeena laqabsashooda, adkeysiga, iyo shaqada adag iyo qoysaskeena sida ay u taageerayaan barashada guriga marka lagu jiro waqtiyadan aan caadiga aheyn.